

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya  
Dowlad Goboleedka Galmudug  
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha



جمهورية الصومالية الفدرالية  
حكومة اقليم جلمدج  
وزارة المالية وتنمية الإقتصاد

Galmudug State  
Ministry of Finance & Economic Development

Taariikh: 27/12/2018

Mudane Wasiir,

**Qorshe-Sanadeedka [sanadka] ee Dakhliga iyo Kharashaadka “Qorshe-Sanadeedka”**

Wasaaradda Maaliyadda waxaa ay halkaan kuugu sheegeysaa in sida ay dhigayaan Qaybta 23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM Act), Xeer-nidaamiyaha #3, faqradda 8aad iyo Xeer-nidaamiyaha #6 in dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha looga baahan yahay in ay Qorshe-sanadeedka Dakhliga iyo Kharashaadka ay Wasaaradda Maaliyadda ugu soo gudbiyaan muddo 30 maalmood ah oo ka bilaabma marka miisaaniyadda soo-jeedinta ah loo gudbiyo Baarlamaanka.

Miisaaniyadda soo-jeedinta ah waxaa Baarlamaanka loo gudbiyey 31 October, sidaa daraaddeed waxaan u baahannahay in la diyaariyo loona gudbiyo Agaasimaha Miisaaniyadda, Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda ugu dambeyn 31 August.

Dokumentiga diyaarsan ee halkaan ku lifaaqan waxaa ku jira qiyaasaha dakhliga-sanadeedka sanadka [sanadka] ee Wasaaraddaada (haddii ay u habboon tahay) iyo miisaaniyadda kharashaadka. Waxaa lagaaga baahan yahay in aad saadaaliso/odorosto dakhliga aad qiyaaseyso in ay Wasaaraddaadu soo ururiso iyo kharashaadka wasaaraddaada ee bil walba. Dokumentiga diyaarsan waxaa ku lifaaqan tilmaamo ku saabsan sida loo buuxinayo Qorshe-Sanadeedka.

Fadlan Waaxda Miisaaniyadda kala xiriir, Telefoonka: **0615556910/0617952251** Wasaaradda Maaliyadda haddii aad u baahan tahay gacansiin.

Mahadsanid,

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda & Hor. Dhaqaalaha

Siciid Siyaad Shirwac



Waxaa la socda.



## **Tilmaamaha sida loo buuxinayo iyo sida joogtada ah ee loo maareynayo Qorshe-sanadeedka Dakhliga & Kharashaadka (“Qorshe-Sanadeedka”)**

### **1. Raadraac**

Sida ay dhigayaan Qaybta 23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (*PFM Act*) iyo Xeer-nidaamiyaha #3 faqradda 8aad, Abuurista Habraacyada Miisaaniyadeed ee Dhammaadka Sanadka, waxaa waajib ah in Qorshe-Sanadeedka la diyaariyo sanad walba waxaana ay qayb ka tahay geeddi-socodka diyaarinta miisaaniyad-sanadeedda.

Miisaaniyad-sanadeedda iyo qiyaasaha dakhliga ayaa loo baahanyahay in loo saadaaliyo si bille ah. Tani waxaa ay gacan ka geysaneysaa korjoogteynta iyo saadaalinta/odoroska qulqulka kaashka ee Dowlad-goboleedka Galmudug. Intaas ka sokow, qorshe-sanadeedka waxaa loo adeegsanayaa in uu sal u noqdo qoondemaha miisaaniyadda. Sidaa daraaddeed waxaa muhiim ah in la hubiyo in saadaasha/odoroska miisaayadda kharashaadka iyo soo-ururinta dakhligu ay sax tahay, la korjoogteeyo mar walbana ahaato mid waqtiga la joogo waafaqsan. Qaybta 23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (*PFM Act*) ayaa waajibineysa in Qorshe-sanadeedkan dib-u-eegis lagu sameeyo bil walba iyo in wixii beddelaad ah loo soo gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda si ay ugu ansaxiso muddo toddobo (7) maalmood gudahood ah ka hor bilaabashada bisha beddelaadda/daha lagu sameynayo Qorshe-Sanadeedda ay la halmaasho.

30 maalmood gudahooda marka miisaaniyadda loo gudbiyo Baarlamaanka, Wasiirka Maaliyadda waa in uu dhammaan Wasaaradaha iyo Madaxda Hay’adaha Kharashgareynta ku waajibiyaa in ay diyaariyaan qorshe-sanadeedyadooda kharashaadka iyo waqtiyada uu dakhligu u imaanayo (waa haddii ay hay’addu dakhli soo galee) oo loo kala jebebiyey bil-bil.

Toddoba (7) maalmood gudahooda marka miisaaniyadda uu ansaxiyo Baarlamaanka, Waaxda Miisaaniyaddu waxaa ay cusbooneysiineysaa Qorshe-sanadeedka iyada oo gelineysa tirooyinka miisaaniyadda la qoondeeyey waxaana ay u direysaa Wasaaradaha iyo Madaxda hay’adaha Kharashgareynta si ay u cusbooneysiyaan tirooyinka saadaasha sanadlaha ah. Waxaa waajib ah in midan la cusbooneysiyo oo waaxda Miisaaniyadda loogu soo gudbiyo muddo toddoba (7) maalmood ah ka dib marka la helo Qorshe-Sanadeedka si loo cusbooneysiyo.

## 2. Diyaarinta Qorshe-Sanadeedka

Dokumentiga diyaarsan ee Qorshe-Sanadeedka waxaa uu muujinayaa:

- Sumad (heerka miisaaniyadda la qoondeeyey)
- Faahfaahin
- Miisaaniyad-sanadeedda (waxaa uu sheegayaa “soo-jeedin ah” ama “la qoondeeyey”) – Waxaa ku qoraya Waaxda Miisaaniyadda
- Joog-u-taxda Bilaha (Jannaayo ilaa Disembar).

### 2.1. Saadaasha Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah

- a) Tirooyinka miisaaniyadda soo-jeedinta ah (Joog-u-taxa D) waxaa Qorshe-Sanadeedka gelinaya Waaxda Miisaaniyadda.
- b) Wasaaradaha iyo Hay’adaha waxaa looga baahanyahay in ay saadaaliyaan dakhligooda iyo kharashaadkooda ee bil kasta (Jannaayo ilaa Disembar). Saadaashan waxaa ay ku saleysnaan kartaa qaabkii uu ahaa dakhligii la ururiyey sanadkii hore iyo kharashaadka la filayo, sida mushaaraadka iyo ujuurooyinka waxaa ay ahaanayaan kuwii hore haddii aan shaqaale kale la qaadan sanadka, kharashaadka adeegyada/khadamaatka waxaa ay ahaanayaan kuwii hore waxaana kharashaadka safarka uu ahaanayaa saadaasha bisha/bilaha la filayo in uu safarku dhaco
- c) Kala duwanaansho kasta oo ay kala duwanaadaan wadarta saadaasha (joog-u-taxa E) iyo wadarta miisaaniyadda la soo jeediyo waxaa ay ka muuqaneysaa tirada saadaasha (joog-u-taxa E) oo isu beddela casaan. Kaladuwanaanshahan ayaa loo baahan yahay in dib loogu noqdo oo la saxo. **Ogow:** tirada saadaasha sanadka waa in ay waafaqsanaataa miisaaniyadda soo-jeedinta ah iyo qiyaasaha.

### 2.2. Saadaasha Miisaaniyadda La Qoondeeyey

- a) Qorshe-sanadeedka Wasaarad iyo Hay’ad kasta waa la cusbooneysiinayaa iyada oo Waaxda Miisaaniyadda ay tirooyinka gelinayso miisaaniyadda la qoondeeyey (Joog-u-taxa D). **Ogow:** Tirooyinka bil kasta loo saadaaliyey si ku fadhida miisaaniyadda la soo jeedinayo isma beddelayaan. Marka miisaaniyadda saadaasha ah iyo miisaaniyadda la qoondeeyey ay kala duwan yihiin, Qorshe-Sanadeedka waxaa uu dhigayaa tirada saadaasha ah (Joog-u-taxa E) ee leh midabka casaanka ah. Kala-duwanaansho kasta oo u dhexeeya wadarta la saadaaliyey (joog-u-taxa E) iyo wadarta miisaaniyadda la soo jeediyey waxaa loo baahanayaa in dib loogu noqdo oo lana saxo. **Ogow:** tirada saadaasha sanadka waa in ay waafaqsanaataa miisaaniyadda la soo jeediyey iyo qiyaasaha.
- b) Wasaaradaha iyo Hay’adaha waxaa looga baahan yahay in ay dib-u-eegis ku sameeyaan Qorshe-Sanadeedka, ay cusbooneysiyaan tirooyinka saadaasha iyaga oo hubinaya in tirooyinka saadaasha iyo miisaaniyadda ay is-waafaqsanaadaan.

**Ogow:** Qoondeymaha miisaaniyadeed waxaa ay ku saleysnaanayaan tirooyinka saadaasha billaha ah, sidaa daraaddeed Wasaaradaha iyo Hay’aduhu waa in ay hubiyaan in saadaalhoodu ay sax yihiin.

### 2.3. Dib-u-eegista Billaha ah ee Qorshe-Hawleedka

- a) Wasaaradaha iyo Hay’adaha waxaa looga baahan yahay in ay la socdaan Qorshe-Sanadeedyadooda ayna dib-u-eegis ku sameeyaan bil walba.
- b) Waaxda Miisaaniyadda ayaa Wasaarad Kasta iyo Hay’ad Kasta waxa ay warbixin laga soo saarey FMIS-ka oo muujineysa miisaaniyaddooda iyo kharashaadka dhab ahaan ay isticmaaleen ku siineysaa 1 maalin ka dib dhammaadka **bil** kasta.

- c) Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxaa ay cusbooneysiinayaan Qorshe-Sanadeedka iyaga oo gelinaya is-beddel kasta oo la xiriira tirooyinka miisaaniyaddooda, waxaa ay dib-u-eegis ku sameynayaan tirooyinka saadaashooda waxaana ay u cusbooneysiinayaan hadba sida loogu baahdo
- d) Qorshe-sanadeedyada dib loogu noqdey ayaa Waaxda Miisaaniyadda loogu gudbinayaa waqtigii sharcigu u qoondeeyey gudhiisa.

Dhammaad